

Si wada jir ah aan uga soo horjeensanno danbiga nacayb ka ah

Waa maxay danbi nacayb ah?

Danbi nacayb ah waa danbiga loo sameeyo si ula kac ah si loogu xad gudbo shakhsii ama koox dad ah ayadoo la eegayo asalkooda, midabka jirkooda, caqiidaddooda, rabitaankooda galmo, nooca jinsigooda ama cabiraaddooda, ama xaalado kale oo la mid ah.

Maxaan samayn karaa haddii aan dhibbane u noqdo ama goob joog ka ahaado danbi nacayb ah?

- Haddii danbigu uu socdo – ka wac booliska 112.
- Haddii danbiga horey loo sameeyay, ku war gali dhacdada booliska 114 14 ama saldhigga booliska.
- Ka la xiriir Taageerada Dhibanaha 116 006 si aad taageero u hesho ama aad u samayso su'aalo weydiin. Uma baahnid in aad marka hore warbixin boolis samayso.
- Wuxaad ula talin kartaa booliska danbiga nacayb ka ah si qarsoodi ah. Sidaas wuxaad ku samayn kartaa adigoo wacaya 114 14 ama si online-ah barta polisen.se.

Maxay tahay sababta aan ugu wargalinayo booliska danbiga nacayb ka ah?

Boolisku waxay u baahan yihiin in ay ogaadaan goorta danbiga nacayb ka ah la galay si ay u baaraan danbiga ugana hortagaan in aan lagu soo celin. Xitaa haddii kiiskaaga uusan u gudbin wax ka qabasho max-kamadeed, wuxaad gacan ka gaysanaysaa in bulshada laga dhigo mid bad qabta adoo sheegaya danbiga.

Maxay u tahay wax wanaagsan haddii taageero la i siiyo haddii aan dhibane u noqdo danbi nacayb ah?

Waxay noqon kartaa mid murugu leh ilaa xad in aad noqoto dhibane danbi nacayb ah. Wajihidda in uu qof kuu wax yeeleeyo ayadoo sababtu tahay aqoonsigaaga – cidda aad tahay – had iyo jeer waxay reebtaa dhaawacyo daran. Sidaa darteed waa shay wanaagsan in aad la hadasho qof kaasoo khibrad u leh wax ka qabashada dadka dhibbanayaasha u noqday danbiga. Taageerada Dhibbanaha waxaa ka shaqeeya shaqaale xirfad leh, dabacsan kuwaasoo waqtii u haya in ay dhagaystaan bixiyaanna taageero shakhsii. Ma jiro shardi ku xiran in aad ku wargaliso dhacdada booliska si laguu siiyo taageeradooda. Taageerada waxaa lagu bixin karaa ilaa 20 luuqadood.

Warqadda macluumaadka waxaa loo soo saarey in ay qayb ka noqoto mashruuca Swetic.



With the financial support from the Rights, Equality and Citizenship Programme of the European Union, European Commission. This publication reflects the views only of the author, and the European Commission cannot be held responsible for any use which may be made of the information contained therein.